Kitaabka Quduuska ah ee loogu talo galay Carruurta

Soo-jeedinayaa

# Ciise Wuxuu Xushay Laba Iyo Toban Caawisa



Waxa qoray: Edward Hughes

Waxa Tusaaleeyay: Byron Unger; Lazarus
Alastair Paterson

Waxa dhaqan-geliyay: E. Frischbutter, Sarah S.

Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia


Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org

©2023 Bible for Children, Inc.
Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato
qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.

Ciise waxa uu sameeyo waxyaalo mucjisa ah. Wuxuu daweeyey cuduradii, dad dhibanaa buu qalbiyadooda iyo maskaxdooda nabadeeyey, oo wuxuu Ereyga Ilaah.



Dad badn baa u yimid inuu caawiyo oo bogsiiyo. Wuxuuna go'aansaday inuu ka xusho laba iyo toban nin kuwii Isaga raacsanaa, inay ka caawiyaan hawshiisa Ilaah.



Haddaad leedahay xulasho muhiim ah inaad samayso, Ilaah ma baryaysaa? Sidaa Ciise ayaa sameeyey!




Wakhti gaaban buu aaday meel buur ah oo wuxuu la hadlay Aabbihiisii samada ku jiray. Ciise wuxuu tukanayaya ilaa gabal dhicii qoraxda madoobaaneysay.


Ciise wuxuu salad
ku jiray ilaa iyio
habeenkii oo dhan.


Aroortii buu u yeedhay xertiisii – dhamaan saaxiibadii we adeeceen oo yeeleen Isaga. Laba iyo toban ka mid ahaa ayuu doortay rasuullo.



Labadii ugu horreysay ee uu doortay waxay ahaayeen walaalo, Simonkii Butros iyo Andros. Waxayna ka soo tageen shaqadoodii kaluumeysiga markii uu Ciise u yeedhay oo way raaceen.



Yacquub iyo Yooxanaa,
wiilashii Sebadii, xitaa
waxay ka soo tageen
shabagyadii kaluumeysiga.




Ciise weliba wuxuu doortay Filibos, Bartolomayos, Matayos, Toomas, Simon qiioolihii, Yacquub ina Alfayos, Yuudas Yacquub walaalkii, iyo Yuudas Iskaariyot, kii gacan gelin doonay ee noqday cadowgii Ciise.



Ciise waxa uu barayo inay tahay sidii aqal la dhisayo aas aaskiisa adag oo kale.  Dabka iyo dabaysaha ay san dumin karin.



Laakiin ma aysan aqbalin Ciise' Ereygu waa sidii dhismo aqal laga dul dhisay ciid, kolkii ay dabaysha xoogga leh timaaddo iska dhaca.



Qaar ka mid ah Amarada Ciise wax sahlan maysan ahayn. “Qof haduu dhanka midigta kaa dharbaaxo, u du’ dhanka bidixda,” weliba wuxuu baray. “Inay cadowgooda jeclaadaan.” Dadku waxay u baahan yihiin inay ku noolaadaan sidii Ciise oo kale.



Ciise weliba dadka wuxuu u sheegay inay si hoose u tukadaan – inaysan isku tustusin dadka hortooda sida ay sameeyaan wadaaddada hoggaamiya diiinta ay sameeyaan.



Ciise wuxuu yidhi Ilaah baa
cunto dhar ba siin doona
dadka kuwa Isaga rumeysan.
Shimbiraha Isagaa cunto siiya
oo eega quruxda midabada
ubaxyada duurka sida ay baxaan.



Dadkiisa waa inay aaminaan oo wax walba oo ay u baahn yihiin wuu siin doonaa.



Maalintaa xertiisii uu doortay waxyaalo badan buu baray. Markii uu dhameeyey, nin baras leh baa u yimid wuu bogsiiyey.



Ciise wuu u jawaabay ninkii baraska qabay, "Waan kaa bogsiin doonaa." Iyagoo xertiisii eegayaan, ayuu bogsiiyey, wuuna bogsooday baraslihii. Wuu bogsiiyey! Wiilka Ilaah keliya ayaa sidaa samayn kara. Xertiina wey garteen inuu leeyihiin Sayid.



# Ciise Wuxuu Xushay Laba Iyo Toban Caawisa

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Matayos 4-7, Markos 1, Luukos 6

"Erayadaada furniinkoodu wax buu iftiimiyaa." Sabuurka 119:130

# Dhammaad

Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Ciqaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro ciqaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysanahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad uugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16